

Warbixin ku saabsan ka qaybqaadashada Letterbox Club Sweden



Waa maxay Letterbox Club?

Letterbox waxaa loogu talagalay in lagu simuleed kareeyo oo lagu kiciyo xiisaha ilmahaaga iyo rabitaanka akhriska, tirinta iyo barashada. Wuxaan tan ku samaynaa annagoo u soo dirayna baakado ay ku jiraan buugaag, ciyaaraha iyo agabka qoraalka ilmahaaga.

Baakad kastaa wuxaan tan ku samaynaa annagoo u soo dirayna baakado ay ku jiraan buugaag, ciyaaraha iyo agabka qoraalka ilmahaaga. Baakad kastaa wuxaan tan ku samaynaa annagoo u soo dirayna baakado ay ku jiraan buugaag, ciyaaraha iyo agabka qoraalka ilmahaaga. Buugaagta qaar, qoraagu wuxuu qoray warqad la soo diray. Intaa waxaa dheer, waxaa jira dhowr waxyaalood oo kale oo baakadaha ah, sida buug calaamadeeyaha, qalimaan, tirtire, iwm. Baakadaha waxaa had iyo jeer si toos ah loogu diraa ilmahaaga.

Aasaas

Letterbox Club asal ahaan waxay ka timid England. Iswiidhan, waxaan la shaqeynay Letterbox ilaa 2014. Mar aan waydiinay caruurtii iyo qoysaskoodii ku sugnaa Letterbox, aad bay ugu farxeen oo ay ugu qanceen in ay qayb ka noqdaan. Markii aan tijaabinay waxbarashada carruurta, natijjadu waxay noqotay mid rajo leh, carruur badan ayaa u muuqda inay kor u qaadeen awooddooda wax akhris. Ujeedada baakadooyinka iyo waxa ku jira waa dhiirigelinta iyo kicinta xiisaha carruurta iyo rabitaanka inay wax akhriyaan, iyada oo aysan dareemin wax shuruud ah ama sida inay qabtaan layliga.

Maxaa dhacaya hadda?

Adiga iyo ilmahaaga waxaa hadda lagu martiqaadayaan inaad ka qaybgashaan wareegga xiga ee Letterbox Club. Carruurta ka qaybqaadata waxay heli doonaan lix bilood lix baakado oo buug ah iyo ciyaaro. Wuxaan hamuun u qabnaa inaan ogaano waxa ay carruurta iyo waalidiintu ka qabaan ka-qaybgalka, sidaa awgeed waxaanu samayn doonaa qiimayn. Daraasad cilmi baaris ah ayaa sidoo kale la samayn karaa. Carruurta qaarkood ayaa loo doortaa daraasadda cilmi-baarista. Wuxaad heli doontaa maclumaad dheeraad ah hadhow haddii ay tani adiga ku khusayso.



Sawir: Johan W Avby.

Ma jiraan wax laga filayo iyo shuruudaha ka qaybgalayaasha?

Ma jirto wax shuruud ah oo ku xiran in ay carruurtu akhriyaan buugaagta ama ciyaaraan ciyaaraha. Fikradda Letterbox Club waa inay noqoto mid aad u xiiso badan oo iyaga laftoodu ay rabaan inay akhriyaan buugaagta oo ay ciyaaraan ciyaaraha. Sidoo kale ujeedadeenu maaha in waalidku caruurtooda ku cadaadiyaan inay ka faa'iidaystaan waxa ku jira baakada ama ay u arkaan cashar, laakiin waxaanu rajaynaynaa oo aanu aaminsanahay inaad adigu waalid ahaan noqon doonto mid hiil iyo hooba la garab istaago oo aad xiisayn doonto waxa cunuggaagu helayo. Dhammaan waalidiinta sidoo kale waxay helayaan baakado waxyaabo dhiirigelin kara wadaagista aqrinta iyo waayo-aragnimada la ciyaarista ilmaha.

Carruurta iyo waalidkaba si uun baa loo waydiin doonaa siday u arkaan waxa ku jira baakadooyinka. U soo Jawaabistu waa ikhtiyaari.

Yaa ku biiri kara Letterbox Club?

Letterbox Club waa hindise loogu talagalay carruurta da'doodu u dhaxayso 4-11 ee ku nool guryaha qoyska ama ku nool qoysaska haysta taageerada dayactirka muddada-dheer.

Su'aalo kale ma qabtaa?

Haddii aad hayso su'aalo aan lagaga jawaabin macluumaadkan, waxaad waydiin kartaa qofkaaga xariirka xafiiska adeegga bulshada ama waxaad su'aasha ku soo diri kartaa iimayl ahaan: letterboxclub@allmannabarnhuset.se.



Sawir: Johan W Avby.